

Waalidku Waxa Ay U Baahanyihiin Macaawin: Dhibaatooyinka La Xiriira Dib U Dhaca Dabciga Iyo Dareenka

Families Need Support: The Challenges of Emotional and Behavioral Disorders Somali Version

Waalidku ma aha kaligood

Inkasta oo ay badan tahay tirada caruurta leh dib u dhac xaga dabciga iyo dareenka, hadana waxa jirta in caruur badan ay si fiican ula socdaan una dhaqmaan marka loo eego xaga iskuulka iyo bulshadaba. Taasina waa mid waalidka dhiiri galin karta oo loo baahanyahay in ay waalidku ku faanaan.

Waxa badi dhacda in qoysasku ay ka maqlaan^{3/4} iskuulka, bulshada, awawgood iyo ayaydood, iyo waalidka kaliba in waalidka “fiican” ay leeyihiin ilmoo “fiican”. Taasina waa fikrad la isku raacay in ay waalidku ka mas’uul yihiin ilmuhu sida uu u dhaqmo.

Dhibaataada ay leedahay fikrada noocaas ihi waxa weeyaan, waalid badan oo aad u fiican ayaa waxa laga yaaba in ay leeyihiin ilmo loo bogi waayo dhaqankiisa. Waxana dhacda badi in waalidka dad badan oo ay ka mid yihiin macalinka, waalidka kale, iyo dadka khibrada u leh ee la shaqeeya ilmaha ay ku eedeeyaan waalidka dib u dhaca xaga dabciga. Waxa kale oo kasii xun in waalidku isu qaataan in ay iyagu leeyihiin khaladka.

Waalidnimadu waa shaqo aad u adag, xataa hadii ilmuhu uuna lahayn dhibaato xaga dabciga ah. Ma jiro qof u dhashay khibrad lagu xaliyo dhibaato walba, hadana badi waxa dhacda in marka ay waalidku codsadaan macaawin in ayna helin ilaa dhibaataado heer xun ay gaadho mooyaane.

Qoys walba oo leh ilmo qaba dib u dhac xaga dabciga ayaa waxa ay u baahanyihiin in laga caawiyo xaga, warbixinta, dheerigalin, iyo tababar.

Dhibaataada xaga dabciga iyo dareenka waxa ay ku dhici kartaa qoysas kala gadisan, xaga dhaqalaha, waxbarashada, iyo midabkaba. Caruurta lagu sheego in ay leeyihiin dhibaataada dabciga ayaa waxa dhici karta in ay ku nool yihiin guri hal waalid ah ama mid labaduba joogaan. Waxa kale oo dhici karta in ay la nool yihiin dad kori-

naya (foster-parent) kuna nool yihiin magaalada, tuulada, amaba meel magaalada ka baxsan.

Waalidku waxa ay u baahanyihiin macaawin

Inkasta oo qoysasku ku kala gadisan yihiin siyaabo badan sida dhaqanka, midabka, iyo dhaqalaha hadana waxa jirta waxyaabo badan oo ay isaga mid yihiin. Waxa ay qoysasku ka siman yihiin dhibaataada ka qabsata xaga helitaanka waxqabadaka (services) la xiriira baahida ilmaha iyo sida mararka qaarkood u dareemaan in ay cidlo taaganyihiin. Waalidku dhamaan waxa ay u baahanyihiin warbixin hufan oo ku saabsan xaga waxqabadka iyo waxbarshada labadaba. Waxa kale oo ay u baahanyihiin taageero iyo cod si ay u xaliyaan dhibaataada la xiriirta dabciga ilmaha. Waalidku waxa kale oo ay ka siman yihiin jacayl xad dhaaf ah oo ay u qabaan ilmahooda si kastaba ha u arkaan dadka kale eh.

Waalidka khibrada u leh helitaanka warbixinta, macaawinaadka iyo dadka u tabiya qoysaska macaawinta ayaa saldhig u ah waxqabadka iyo waxtarka ilmaha. Waalidka oo hela taageeroda ay u baahanyihiin ayaa waxa ay u fasaxda in ilmahooda ay jecelyihiin ku daryeelaan guriga. Qoysaska waxtarku ku yar yahay waxa u banaan in ay codsan karaan waxqabad guriga ka baxsan (out of home placement) si ay u badbaadiyaan ilmaha iyo reerka intiisa kaleba.

Wakhtigan aan joogno, gobolada badi, waalid badan oo leh caruurta lagu tilmaamo in ay leeyihiin nidaam daro xaga dabciga ah ayaa waxa ay leeyihiin urur ka caawiya waalidada kale xaga warbixinta iyo guubaabin. Meelahaas oo kalena waalidku waxa ay ka helaan macaawinaad aad u badan ururadaasina badi waa kuwo ay ka mas’uul yihiin waalidu si ay ula kulmaan una wada hadlaan qoysaska ka siman dhibaataada. Waxa kale oo jira kooxo ay ka mas’uul yihiin dadka khibrada u leh xaga arimaha dabciga iyo dareenka oo loo yaqaan (mental health providers).

.....

Hadii waalidku u arkaan in ayna ka helin kooxaha, waxa ay yeeli karaan in ay isku dayaan mid cusub in ay samaystaan. Bilowga ururka cusub waxa kaa caawin kara meelo badan. Waxa aanad soo wici kartaa PACER Center si aad u heshid warbixin dheeraad ah.

In ay isku dayaan mid cusub in ay sameeyaan. Bilowga ururka cusub waxa kaa caawin kara meelo badan. Waxa aanad soo wici kartaa PACER Center si hadii waalidku ay u arkaan in ayna ka helin kooxaha, waxa ay yeeli karaan aad u heshid warbixin dheeraad ah.

Qoraalkan waxa laga soo gudbiya, buuga ah Parents of Children with Emotional or Behavioral Disorders, © 2001 PACER.